# Magangalyoddoonka: kooraska ku saabsan bulshada Finland wuu isbeddelayaa

Kooraska ka hadlaaya bulshada Finland, waa mid qofka magangalyoddoonka qaxootiga ah siinaya macluumaadka asaasiga ah ee ku saabsan bulshada Finland. Waxaana kooraskaan illaa iyo bilowgii sannadkii 2016 laga qabanqaabinayay xeryaha qaxootiga. Kooraska waxaa lagu sameeyay isbeddel, laga bilaabo bisha Maarso ee sannadka 20201-ka.

## Mustaqbalka xerada qaxootiga ayaad ka heleysaa maaddooyinka loogu talaggalay in qofku iskiis wax isku baro

Xerada qaxootiga ayaa ku siinaysa maaddooyinka iskaa wax isku barista ah, islamarka aad soo degto xerada. Waxaad ka heleysaa macluuumaad ku saabsan bulshada Finland, kahor inta aadan qaadan casharrada kooraska. Haddii aad deggan tahay meel ka baxsan xerada qaxootiga, waxaa maaddooyinka waxbarashada laguugu soo diri karaa cinwaanka boostada ama iimeeylka.

Maaddooyinka iskaa wax isku barista waxaa sidoo kale laga helayaa cinwaanka bogga internetka ee Waaxda socdaalka: migri.fi/suomalaisen-yhteiskunnan-kurssi.

## Koorasku wuxuu ka kooban yahay lix cashar

Mowduucyada casharrada waxaa ay kala yihiin:

- Sharciyada dalkan Finland
- Bulshada Finland
- Sinnaanta
- Ka shaqaynta Finland gudaheeda
- Caafimaadka jinsiyeed iyo jinsinnimmada
- Caddaaladda

Labada cashar ee kala ah sharciyada Finland iyo kan ku saabsan bulshada Finland ee kooraskaan ka mid ah, ayaa mustaqablka khasab ku ah in ay qaataan dhammaanba dadka magangalyoddoonka qaxootiga ah ee da'doodu ka weyn tahay 16-ka sano, kuwaasoo ay ku waajibka tahay in ay ka qaybqaataan howlaha waxbarashada iyo shaqada. Xerada qaxootiga ayaa kuugu yeereysa qaadashada casharradaan. Haddii aad ka qaybqaadan weydo casharrada khasabka ah, waxaa lagaa dhimayaa lacagta biilka ee xerada qaxootiga laaga siiyo.

Haddii aad adigu hore u soo qaadatay qaybaha labadaas kooras ee kala ah sharciyada Finland iyo kan bulshada Finland, lagaama rabo in aad mar labaad qaadato casharradaas.

Casharrada kale ee koorasyada waxaa hadba sidii ay suurtaggal u noqoto looga qabanqaabin doonaa xerada qaxootiga. Ka qaybqaadashada koorasyada kale waa kuwo ikhtiyaari ah oo aan khasab ahayn.

## Qaybta kooraska ee sharciyada Finland waxaa mustaqbalka ka mid ah, kooras dhanka internetka ah oo si madaxbannaani ah qofku u baran doono

Xerada qaxootiga ayaa ku siinaysa hagista iyo sumadda ama astaanta lagu galaayo kooraska internetka ah, si aad uga qaybqaadato. Haddii aad u baahato waxaa xerada qaxootigu ay ku ammaahin doontaa kombiyuutar, tableeti ama telefoon, kuwaasoo loogu talaggalay in qofku haysto mudada uu kooraska dhiganaayo.

## Natiijada kooraska aad soo qaadaty waxaa laguugu qorayaa qiimaynta heerkaaga aqoonta

Natiijooyinka dhammaanba koorasyada ku saabsan bulshada Finland ee aad dhigatay (casharrada iyo kooraska internetka) waxaa laguugu qorayaa qiimaynta heerkaaga aqoonta. Xerada qaxootiga ayaa liiska qiimaynta heerkaaga aqoonta kuu soo daabacaysa, marka aad xerada ka guurayso. Xitaa waqtiyada kale ee aad u baahato qiimaynta heerkaaga aqoonta, xerada qaxootiga ayaad weydiisan kartaa in ay kuu soo daabacdo, tusaale ahaan marka aad shaqada codsnayso awgeed.